

Cilmiga Nafta|Psychology

Waxaa qoray: Muktaar Axmed Nuur

Maxaa maskaxdaada kusoo dhaca markaad maqasho cilmi nafsi ? waa hubaal in dad badani ay ka haystaan fikrado khaldan iyo wax ka baxsan garashada qofka, haddii asxaabtaadu maqlaan inaad tahay qof cilmi nafsiya bartay, waxa ay kaa aaminayaan qof garan kara waxa aad ku fikirayso iyo qof dareemi karaa waxa aad dareemayso. Aqoonta cilmiga bulshada oo dalkeenna aad ugu yar baa keenaysa in wax khaldan laga aamino qaybaha cilmiga bulshada ee kale ah falsafadda, cilmiga nafta, cilmiga barashada bulshada iyo qaar kale oo badan.

Ugu horrayn si fudud Cilmi nafeedka waxa lagu qeexaa “Barashada maskaxda iyo hab dhaqanka qofka iyadoo la tix gelinayo waxyaabaha saamaynta ku leh maskaxda iyo hab dhaqanka ah oo saamaynta baayoolaji, cadaadiska bulshada iyo arrimaha deegaanka.” Waxyaabahan oo is biirsada ayaa waxa ay saamaynta taban iyo mid toganba ku leeyihiin sida uu qofku u fikiro, u dhaqmo iyo sida uu waxa u dareemo. Guud ahaan aqoonta kasmada naftu waxa ay ku salaysan tahay barashada qaabka uu maanku amma maskaxdu u shaqayso.

Akhriste marka shay kasta la ogaado qaabka uu shaqeeyo ayaa la garan karaa oo la fahmi karaa waxa saamaynta ku leh, tusaale ahaan marka aad xanuun dareento waxa aad bookhataa dakhar aqoon u leh xanuunka aad ka cabanayso, ka dib waraysi ayaa lagaa qaadayaa ugu dambaynna shaybaadh ayaa lagaa qaadi. Dakhtarku waxa uu yaqaanna sida xubin kasta oo jidhkaaga ku taallaa u shaqayso, saas awgeed shaybaadhku keliya waxa uu is bar-bar dhig ku samaynayaa sida jidhka caafimaadka qabaa uu u shaqeeyo iyo sida jidhka xanuunka qabaa uu u shaqeeyo, ka dib waxa si fudud lagu ogaanayaa meesha ay cilladu haysato.

Maadaama aynnu nidhi hab dhaqanka qofka iyo guud ahaan aqoonta cilmiga naftu waxa uu kasoo bilaabmaa maskaxda, bal aynu baranno waxa ay masakxdu tahay iyo qaabka ay u shaqayso iyo weliba qaab dhismeedkeeda. Maskax waxa iyana si fudud loogu qeexi karaa “ Waa xubin ka kooban nudayaal iyo neerfo aan tiro lahayn kuwaas oo guta shaqooyin badan oo ah garashada, dareemayaasha iyo guud ahaa wixii la xidhiidha hab dhiska dareen wadka qofka”

Marka la joogo Cilmiga nafta, maskaxda waxa loo qaybshaa 5 qaybood oo waawayn oo kale ah:-

1. **Frontal Lobe**(Qaybtan ayaa qaabilsan fikirka, xusuusta, qiirada, xallinta khilaafka, dhex gelka dadka iyo bulshada, hab dhaqanka, go'aan qaadashada iyo cabbirka xaaladaha).
2. **Parietal Lobe**(Qaybtan ayaa iyaduna qaabilsan guud ahaan hab dhiska dareen wadka jidhka sida, taabashada, aragga, maqalka, urta, iyo dhadhanka. Qaybtan waxa ay maskaxda u qaabilsan tahay inay dareento xogta jidhka iyo maskaxda dibadda uga imanaysa).
3. **Occipital Lobe**(Qaybtani waxa ay qaabilsan tahay aragtida. Waa qaybta dareenta qaab dhismeedka walxaha iyo mibadyada iyo sida deegaanka iyo walxuhu u eeg yihiin).

4. **Temporal Lobe**(Qaybtanna waxa qay qaabils antahay(Fahmidda afka, codka, xusuusta, iyo hab dhiska dareemayasha fahanka iyo faaqidaadda)
5. **Carebellum Lobe**(Qaybtan u dambaysa waxa loo yaqaan maskaxda yar, waxa ay qaabilsan tahay isku miisaanka dhaq- dhaqaaqa jidhka iyo guud ahaan hab dhiska loo yaqaan hab dhiska dareen wadka murqaha iyo xakamaynta jidhaka iyo xubnaha).

Marka loo eego cilmiga qolfaafka iyo qaab dhismeedka jidha(Skeleton System) maskaxda waxa loo qaybiyaa laba qaybood oo kale qaybta midig iyo qaybta bidix. Haddaba akhriste labadan qaybood ayaa qabta shaqooyin kala geddisan oo si tijaabo ah aad si fudud uga arko arko qof kasta oo agtaada jooga. Tusaale ahaan markaad waxbrashada ku jirtay fasalka waxa kula dhigan jiray kuwo ku fiican xisaabta, sayniska maamulka iyo wixii u baahan in la fahmo oo la xalliyo, qofka noocaas waxa awood badan maskaxdiisa qaybta bixida oo qaabilsan afka, xallinta, fikirka, Sayniska iyo xisaabta iyo guud ahaan wixii u baahan falkin.

Sidaas oo kale waxa aad taqaannay amma taqaanaa qof ku fiican hal abuurka sida suugaanta, farshaxanka iyo sawirista, heesaha iyo muusiga, akhriska dareemayaasha dadka, adeegsiga qiyaasaha iyo guud ahaan wixii la xidhiidha hibooyinka kuwaas oo badanaa qofku eebbe u sahlay. Tusaale ahaan qofk hibada u leh suugaanta iyo qofka bartay isku dhadhan iyo macne noqon maayaan, saas awgeed qofka sidaas ah qaybtiisa midig ayaa ka awood badan qaybtisa bidix ee maskaxda.

Eebbe xumo ka nasahnaaye qaabkaas cajiibka ah ayuu u sameeyay maskaxda, waxa jirta barnaamij aad u qiimo badan uu Sheekh Mustafe Xaaji Ismaaciil ka sameeyay maskaxda oo ciwaankeedu yahay “Awoodaha la dayacay” haddaba kasmada nafta amma cilmiga nafta iyo maskaxdu waa kuwo isku xidhan oo aanu midna iskiis u istaagi karin. Dadka ku xeel dheer aqoonta nafeedka waxa ay aad u darsaan qofka maskaxdiisa iyo qaybta awoodda badan.

Ma jiro qof maskax yar amma qof maskax badan, qof kasta eebbe ayaa qaybaha maskaxda ee aynu soo sheegnay mid u badiyay, walow aqoonta laga jaadhay sayniska iyo caafimaadku ay inoo sahlayso in aynnu qofka sare u qaadi karo awooddiisa maskaxeed.

Sidoo kale gor loo sii qaadi karo qaybta maskaxda ee qofkaas uu ku xooggan yahay. Dhaawac yar oo madaxa kaasoo gaadha ayaa waxa uu saamayn ballaadhan ku yeelayaa guud ahaan shaqada maskaxda qofka. Guud ahaan dadka innagu xeeran waxa ay leeyihiin hab dhaqanno kala geddisa, ma jiraan laba qof ka siman hab dhaqanka iyo qiirada, si fadud haddii aynnu doonanyo in aynnu fahanno aqoonta cilmiga naftada kaleiya waxa innagu filan innagoo si fiican ugu fiirsannada dadka innagu xeeran iyo sidoo kale inaad adigu aad ugu fiirsato hab dhaqankaaga iyo dabcigaaga. Tuusale ahaan dadka innagu xeeran maalin kasta waxa aynnu aragnaa iyagoo ku sugan xaalado kala geddisan.

Cilmi Nafsiga waxa ugu muhiimsan in qofka laga darso qiirada(Emotion) iyo hab dhaqanka(Behavior) waana labada arrimood ee mar kasta aynnu ka aragno dadka, qiiri waa waa muujinta dareemaayaasha farxadda, murugadda, qosolka, fikirka iyo wixii la halmaaha, hab dhaqankuna waa muujinta falal aad kula dhaqmayso dadka kugu xeeran, sida hadal wanangsan, hadal xun, muujinta ficillo togan iyo kuwa tabanba. Qof hadal badan, qof aamusan, qof faraxsan

iyo qof murugsan waa waxyaabaha ugu muhiimsan ee aqoonta masmo nafeeddu ay badanaa aad u daristo.

Aqoonta Naftu waa mid aad u balaadhan oo aan lagu soo koob karin dhawr bog, aqoon nafeeddu waxa ay leedahay qaybo badan oo kale ah;

Abnormal Psychology(Waa cilmiga barashada xanuunada ku dhaca maskaxda, sidaynu horey usoo xusnay qaybaha kale duwan ee maskaxda ayaa suuro gal in xanuun amma cillad ku timmaddo, tusaale haddi xusuustu kugu yaraato, fahanku kugu yaraado amma weelaynta xaaladda, qaybta waa qaybta lagu darsaa xanuunnada iyo cilladaha maskaxda)

Biological Psychology(Qaybtani waa cilmiga barashada sida Baayoolajigu uu saamayn ugu leenahay maskaxda iyo hab dhaqanka, Tusaale ahaan maskaxda waxa ku jira hoormoonno kala duwan, hoormannadaas waxa ay saamayn ku leeyahay qaabka shaqada maskaxda qofka. Sida firfircoonida iyo maskaxdu qaab deg-deg ah amma qaab caajis ah waxa u qabato. Qaybtan badanaa waxa la adeegsadaa tignoolajiyadda sida computerada kala duwan ee lagu eego masakxda).

Clinical Psychology(Qaybtan waxa loo adeegsadaa qiimaynta, daawaynta iyo baadhista khalkhalka ku yimaadda maskaxda. Waxa ay aad isugu dhaw yihiin Abnormal Psychology, waxa kaliya ee ay ku kala duwan yihiin ayaa ah xanuunada maskaxda ku yimaadda ay yihiin laba nooc oo kale ah xanuun dibadda kaga yimi sug jug amma dhaawac iyo mid gudaha oo neerfaha la xidhiidha)

Cognitive Psychology(Fikirka, go'aan qaadashada, xallinta khilaafka, fahanka afka, xusuusta, soo jeedka iyo miyirka ayaa ah cimiga loo adeegsado qaybtan lagu magacaabo Cognitive Psychology, waxa hubaal ah inaad aragtay amma adiguba aad tahay qof ay ku adag tahay inuu gaadho gaadho, waxa kale dhacda in aanad wax ka badan ka xasuusan markaan caruurta ahayd amma se aad dugsiga hoose dhigan jirtay iyo dadkii kula dhigan jiray. Waxa aad aragtay qof badanaa baxsan oo meel ku maqan kaas oo aan dareemayn waxa agtiisa ka dhacaya. Qaybtan ayaa ah qaybta ka shaqaysa arrimaha oo dhan iyo sida loo wanaajiyo loona xalliyo).

Developmental Psychology(Waa qayb aad u ballaadhan oo ka hadasha guud ahaan marxaladaha qofka bani aadamku u maro, marka uu sidaa u calool ilaa inta uu ka dhimanayo. (Lifespan) qaybtan waxa lagu faaqidaa waxa saamaynta ku leh qofka marka uu dasho ilaa inta uu ka dhimanayo, marxaladaha uu qofku maro, sida marxaladda caruurnimada, qaangaadhnimada iyo marka qofku waynaado oo ka gudbo marxaladda dhallin yaro nimada.)

Forensic Psychology(Filimaanta waxa aad ku aragtay in qof farahiisa laga soo helo wax uu taabtay sida hub iyo wax la mid ah, sidoo kale waxa aad aragtay in qofka laga helo hiddasidihiisa dhiigga iyo candhuufta qofka, saas awgeed waa qayb loo adeegsado arrimaha dambi baadhista iyo cilmi baadhista. Sidoo kale qaybtan waxa loo adeegsadaa in lagu aqoonsado qof la aqoonsan waayay wejigiisa, sida qof madaxu ka go'ay, qof jidhkiisu googo'ay oo u badan kuwa ay ku dhaceen qaraxyada iyo shilalku. Keliya dhiigga qofkaas ayaa laga baadhayaa hiddasidaha waxaana la aqoonsanayaa qaraabadiisa.

Personlity Psychology(Maxaa qofka ka dhiga mid ka duwan dadka intiisa kale marka loo eegayo dabci amma hab dhaqan ahaan ? Maxaa qofka ka dhiga mid cadhaysan amma faraxsan ? Maxaa

keena inaad noqoto qof bulshaawi ah ? Maxaa se keena inaad noqoto qof keligii noole ah oo ay ku adag tahay inuu dadka dhex galo ? waydiimahan iyo kowo kale oo badan ayaa ay qaybtani ka hadashaa. Sifooyinka iyo astaamah ay shakhsiyaadku leeyihiin ayay sidoo kale ka hadashaa. Waxa kale oo xusid in in qaybtani ay keliya khuseysa arrimaha shakhsiga ah oo kaliya.

Social Psychology(Qaybtan u dambaysa, waa iyaduna waa qaybaha ugu muhiimsan ee Cilmi nafeedka, qaybtan waxa ay noqotay takhasus aad u baalladhan. Qaybtan waxa ay ka hadashaa hab dhaqanka ay leeyihiin koox gaar ah sida, shirkad, urur iyo koox ciaayreed.

Sidoo kale qaybtan waxa ay ka hadashaa saamaynta ay bulshadu ku leedahay hab dhaqanka qofka, fikraddiisa iyo guud ahaan dabcigiisa oo dhan. Waxa kale oo ay qabtan ka hadashaa hab dhaqanka iyo dabciga u dhexeeya laba bulsho oo ku nool laba deegaan oo kala geddisan, iyo guud ahaan dabciga iyo hab dhaqannada ay bulshooyinku leeyiin.

Qaybaha kala geddisan ee aqoonta naftu kuma koobna inahan uun, sidoo kale waxa jira qaybo kale oo badan oo la xidhiidha aqoon nafeedka, keliyaha intani waa inta aadka loo adeegsado isla markaana baahida badan loo qabo. Haddaba akhriste wax kasta uu leeyahay taariikh iyo qaab uu waxaas kusoo bilaabmay. Badiba aqoonta qaybaha kala duwan lama oga taariikh go'an iyo cid gaar ah oo loo tiiriyo inay bilaabeen, aan ahayn in shaacsanida arrinkaasi lala xidhiidhiyo shakhsiyaad badan iyo taariikho kala duwan yahay.

Erayga “Psychology” asalkiisa waxa la xusaa inuu yahay laba eray oo giriig ah, badina aqoonta Sayniska iyo bulshada waxa lala xidhiidhiyaa giriigga, maadama giriiggu ku jiro deegaanka ugu taariikhda fog adduunka inta la ogyahay. Labada eray waxa loo kala qaadaa “Psyche” oo Micneedu yahay “Naf” halka “Logos” ay tahay barashada, isku darka labadaas eray waxa ay noqotay “ Barashada Nafta” (Psychology).

Sannadku markuu ahaa 428 Ciise hortii ayaa faylasuufkii giriigga ahaa ee Plato ayaa la xusayaa In taariikhda inta la ogyahay uu ahaa qofkii ugu horreeyay ee darsa waxa la xidhiidha nafta iyo dabecadda, waxaa uu xusay oo qorey maqaal uu u bixiyay “Doorarka ay dabecaddu ku leedahay horumarka nafeed ee qofka” sidoo kale Faylasuufkii isna Giriigga ah ee Aristotal ayaa isagana loo tiiriya inuu ahaa dadyowgii ugu horreeyay ee laga maqlo waxyaabo nafta la xidhiidha iyo hab dhaqanka aadanaha.

Wakhtiyadii hore cilmi nafsigu muu ahayn maaddo madax bannaan oo badanaa waxa ku lammaana oo aad uga badnaa falsafadda iyo cilmiga caafimaadka, taas awgeed nin garmal ah oo lagu magacaabo Wilhelm Wundt 1832-1920 ayaa waxa uu markii ugu horray furay shaybaadh loogu talo galay in lagu ogaado waxyaabaha la xidhiidha miyir qabka iyo in qofku miyir ahaan fayow yaahay, waxaannu kusoo bandhigay jaamacadda University of Leipzig in Germany sannadkii 1879.

Tan iyo bilowga cilmigan nafta waxa isoo soo tarayay dugsiyo badan oo la xidhiidha dhinaca Cilmiga nafta, kuwaas oo qoloba dhinac ka istaagayeen aqoonta. Dugsi waxa aynnu uga jeednaa qayb gaar ah, shakhsiyaad gaar ah oo dhinac gaar ah ka istaaga hadba waxa la doonayo in laga arrinsado. Afka qalaadna waxa lagu yidhaahdaa (Schools of Psychology” wax aanay kala yihiin sidan:-

Structuralism: Dugsigan waxa uu aas-aas uu ahaa in lagu darso qaab dhismeedka iyo sida ay u taallo maskaxda bani aadamku, maadama aynnu nidhi guud ahaan cilmi nafsigu waxa uu kasoo burqadaa maskaxda iyo sida ay u shaqayso. Mid ka mid ah ardeydii Wundt oo lagu magacaabo Wilhelm Edward Bradford Titchener (1867–1927), ayaa dalka maraykanka isna ka furtay shaybdhaadh lagu darso maskaxda iyo qaab dhiseedka, sida magaca dugsiga laga fahmi karana (Structure) ayaa iyagu keliya awoodda saaray in aan loogu iman qaab dhismeedka maskaxda.

Functionalism: Nin lagu magacaabo William James (1842–1910) ayaa isna furay dugsigan laga magacaabo (Functionalism) oo ah cilmi lagu darso qaabka dadka iyo xayawaanka maskaxdaada u isticmaalaan in ay la qabsadaan deegaanka ay ku nool yihiin. Dugsiga waxa samaayn wayn ku leh cilmiga barashada naflayda (Biology) oo amma dabeecadda oo uu gadh wadeen ka yahay dabeecad yahankii (Charles Darwin 1809-1882) nuxurkana in dabciga iyo hab dhaqanka dadka iyo xayawaanka uu saamayn ballaadhan ku leeyahay deegaanku.

Psychoanalysis: Aaabaha cilmi nafsiga casriga ah ee u dhashay dalka Ustariya Sigmund Freud (1856-1939) ayaa isaguna waxa uu daaha ka rogay baahi wayn oo aad loo qabay oo ah aragtida faaqidaada dhab dhaqanka iyo maskaxda qofka. Aqoon yahankan ayaa waxa uu ku dooday in qofka saamayn ku leeyihiin fikirkiisa, xusuustiisa damaca iyo dareenkiisa iyo miyir qabka hooseba. Si koobaan dugsigani waxa uu u xilsaaran yahay in qofka dib loo raaco taariikhdiisa hab dhaqan iyo maskaxeed.

Behaviorism: Hab dhaqanku qofku maaha mid cayiman amma go'an oo meel qudha taagan, qofku waxa uu la fal galaa dhacdooyinka maalin laha ah, maalin waa u faraxsan yahay, maalin kalena waa uu murugsan yahay, si haddaba qofku loogu waxa uu yahay hab dhaqankiisa celceliska ah ninkan laga magacaabo John B. Watson (1878-1958) ayaa waxa uu furay dugsigan lagu darsayo hab dhaqanka qofka. Hab dhaqanka qofku inuu yahay mid u badan dhinaca xun iyo inuu yahay mid u badan dhinaca wananagsan ayaa ah waxyaalaha uu dugsigan awoodda saarayo.

Si kastaba waa ay badan yihiin dugsiyada kala geddisan ee la kala yaacay qaybaha kala duwan ee aqoonta nafta, tan iyo taariikhdaas fog, aqoontu naftu waxa ay noqotay mid wakhtigan loo aayo maadaama dunidan casriga ah ay horumar aad u ballaadhan ka gaadhay sayniska iyo Tiknoolajiyadda oo ah laba iskaashigoodu aadanaha wax badan ka caawiyay. Ugu dambeyntii aqoonta naftu maaha wax lasoo koobi karo, akhriste waxa aan rajeynayaa in intani ay kuu noqoto hordhac guud iyo fahan kooban oo laga qaadanayo cimi nafsiga.